

London Fire Brigade (LFB) Guutada Dabdamiska ee Lodan waa adeegga badbaado iyo dab-damis ee ugu balaadhan wadankan UK. Waxaanu halkan u joognaa inaanu London ka dhigno magaalo nabad ah. Himiladayadu waa inaanu noqono horyaalka aduunyada ee dab-damiska iy adeegga badbaadada ee London, dadka ku nool London iyo cidii soo booqataba.

LFB hadd iyo goor way ka jawaabi doontaa wixii dab iy xaalad degdeg ahba, laakiin shaqadaydu waxay is badashay sandihii la soo dhaafay iyadoo aanu imika xoogga saarayno wixii ka hortag dab ah iy badbaadada bulshada.

Waxaanu u hawl galaa inay dadku ka badbaadan dabka iyo arimaha kale ee khatarta ahba, haddii ay guriga, shaqada iyo dhismayaasha kale ee London ay joogaan. Dabka ka dhasha guryaha shil ahaan waa sababta ugu wayn ee sababta dhimashada wixii kasta ee aanu kari karno ayaanu samaynaa si aanu u yarayno baaba'aas. Dadka ayaanu barnaa wixii ay samyn lahaayeen si ay naftooda uga badbaadin lahaayeen dabka. Sidaa waxaanu u samaynaa annagoo:

Booqanayna Guryaha oo hubinana Badbaadada dabka – Dab-damiyayaashu waxay dabka ku booqdaan guryohooda si ay uga talo bixiyaan badbaadada dabka iyo inay rakibaan qaac sheege bilaash ah haddii ay daruuri noqoto.

La shaqayna hay'adaha kale ee la shaqeeya dadka aanu ognahay in khatar dab ay halis u yihiin si ay nooga taageeraan inaanu gaadhi karno dadkaa oo aanu ilaalin karno.

U sheegayna da'yarta khatarta uu keeni karo dabku, sida ay isu badbaadin lahaayeen iyo dhibaataada ay la kulmi doonaan haddii ay sameeyaan yeedhitaan been-abuura. Waxaanu samaynta arrinkaa ka gaadhay guul, taasoo ay ku jirto kooxaha dugisyada.

Yaraynta dab hurinta kas ula kaca ah – waxaanu leenahay koox khaas u ah inay ka hortagaan dabeecada hurinta dabka ee da'yarta waxaanu la shaqaynaa lamaana yaal (partners) si aanu u yereeno danbiyada la xidhiidha dabka.

Bixinayna talo iyo tusaalooyin ku saabsan badbaadada dabka goobaha laga shaqeeyo – shaqo bixiye ahaan waxaad masuul ka tahay inaad hubisid in adiga iyo shaqaalahaaguba ay ogyihiin wixii la samyn lahaa si looga hor tago dabka ka dhaca goobaha laga shaqeeyo iyo sida looga baxsan lahaa haddii uu dab qarxo

Ku samaynaa baadhitaan dhismayaasha – si aanu u hore marino nabadgalayda dhismayaasha aanu la shaqayn doono, oo aanu badhnaa si aanu u hubino inay la kulmeen baahidii ahayd xadaynta dabka, waxaananu qaadnaa talaabo wax ka qabasho ah haddii loo baahdo.